

Waa maxay muhiimada macluumaadka la qoray?

Musalifnimada waa shay darran lamana kansali karo haddii aad isbedesho. Waa muhiim in ka hor intaadan musalifka noqon inaad si buuxda uga warqabto fursadaha kuu bannaan inaan kula dhaqanto deynta aan la maareyn karin – iyo haddii aad doorato inaad sii wadato, waajibaadka iyo cawaaqibka ka dhalanaya musalifnimada.

Ka hor intaadan noqon musalif waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo caddeyn ah inaad fahamtay fursadaha kuu bannaan ee aad kula macaamileysid deynta aan la maareyn karin, iyo cawaaqibka la xiriira musalifnimada – tan waxaa loogu yeeraa **Macluumaadka La qoray**.

Macluumaadka la qoray wuxuu ka mid yahay foomka codsiga deymaysanaha. Waa inaad gudbisaa Macluumaadka La qoray ee saxiixan, oo ay la socoto codsigaaga deymaysanaha iyo qoraalka arimahaaga. Si aad u noqotid musalif waa inaad saxiixdaa oo aad soo gudbisaa codsiga deymaysanaha oo buuxa iyo qoraalka arimaha.